SOOMAALIYA: WEERARRADA LAGU HAYO WARIYAYAASHA

> “Waa wariyayaasha kuwa adduunka u tebiya waxa Muqdisho ka dhacaya. Sababtaas awgeed, dad ayaa jira oo doonaya inay na aammusiyaan. Anigu waan ka fekerey inaan shaqadan ku dhiman doono. Kolkaan baqaba, waxaan arkaa anigoo aan aammusi karinnin, waayo haddaan aammuso yaa sheegaya dhibaatada shacabka lagu samaynayo. Waxaannu nahay kuwa keliya ee shacabka u dooda.”
>
> Wariye deggan Muqdisho

Soomaaliya waa meelaha adduunka ugu khatarsan oo suxufi laga noqdo. Dhibaatada waddanka ka jirta awgeed, ayaa si ku talaggal ah loogu dilaa suxufiyiinta. Ilaa bishii Febraayo ee sannadkii 2007dii waxaa lagu diley sagaal wariye, kuwo kalena waa loo dhaartay kuwana waa la xirey oo weliba la handaday. In ka badan ilaa 50 suxufi waxaa lagu khasbay inay waddanka isaga baxaan. Xarumaha warbaahinta iyo meelo kale oo suxufiyiintu isticmaalaan baa marar badan la xirxirey.

Dhibta iyo weerarrada loo geysto wariyayaasha iyo warbaahinta way ka badan tahay kolka loo barbardhigo dhibta ay dagaalladu Soomaaliya u keenaan. Waxay taasi ku tusaysaa inay tahay hab la doonayo in lagu yareeyo suxufiyiinta madaxbannaan.

Xaaladda wariyayaasha Soomaaliya waxay tahay mid aad u xun ilaa iyo sannadkii 1991kii, waa markii ay dowladdii keligitaliye Siyaad Barre dhacday burburkuna bilaabmay. Khilaafka socda ee u dhexeeya ciidammada dowladda ku-meel-gaarka [DKMG] ah oo gacan ka helaya kuwa Itoobiya iyo kooxaha ka soo horjeeda oo salka ku haya qaab qabiil gacanna ka helaya Maxkamadaha Islaamiga ah ayaa ciriiri geliyey xorriyaddii suxufiyiinta, qaabkii ay wax uga sheegi lahaayeen dhibaatada waddanka ka taagan.

© Reuters

Soomaali ka qaybqaadanaysa aaskii Bashiir Nuur Geeddi, ku-simihii madaxa idaacadda madaxabannaan ee Raadiyo Shabeelle, Muqdisho. Niman hubaysan oo aan haybtooda la aqoonnin ayaa ku diley aqalkiisii Muqdisho, 19kii Oktoobar 2007dii.

Wariyayaasha Soomaaliya looma oggolaado xuquuqdooda nololeed. Suxufi iskuddaya inuu xuquuqdiisa ka hadlana waa la xiraa. Intooda badan waxay weerarradani dhaceen lixdii bilood ee u dambeeyey. Waxaad mooddaa inay tahay qaab ay ku talaggaleen kuwa dirirtu ka dhaxayso inay mar walba cadaadis saaraan oo xakameeyaan wariyayaasha.

Taasina waxay tilmaan u tahay beddelidda abbaarta nidaamkii saxaafadda. Sannadihii 2005tii iyo 2006dii waxaa la furay wargeysyo, raadiyayaal iyo telefiishanno ay leeyihiin qabiillo iyo hoggaamiyayaal dagaal. Kuwaasoo beddeley xorriyaddii ay saxaafaddu lahayd. Tusaale ahaan, marka dadku ay teleefoonnada u soo diraan xarumaha raadiyayaasha waxay si toos ah uga hadlaan afkaartooda, wixii ay cabsi ka qabaan iyo waxay ku qanacsanyihiin.

Dhowaan ayaa Ururka Cafiska Caalamka [UCC] oo ku magacdheer "Amnesty International" wuxuu waraysi ka qaaday 50 wariye oo Soomaali ah. Waxay sheegeen inay aad u korortay handadka iyo dhibaatooyinka loo geysto wariyayaasha, gaar ahaan, saddexdii bilood ee u dambeeyey, dabayaaqadii sannadkii 2007dii iyo horraantii 2008da.

Qoraalkani wuxuu taabanayaa dhibaatada suxufiyiinta loogu geysto gudaha Soomaaliya. UCC wuxuu markiiba si deg deg ah ula xiriiray qaybaha ku dhex dagaalamaya Soomaaliya si ay u xaqdhowraan madaxbannaanida saxaafadda xorta ah.

SHARCIGA CUSUB EE SAXAAFADDA

Baarlamaanka DKMG ahi wuxuu soo saaray sharci cusub ee saxaafadda bishii Disembar 2007dii. Waxaa ku jira qodobbo wax xakameeynaya. Ha yeeshee, waxaa kale oo uu leeyahay qaabdhismeed iyo qodob u qaabbilsan wixii dacwad ama cabasho ah lagu hagaajiyo. Dadka warbaahinta waxaa khasab looga dhigay inay is diiwaangeliyaan; inay horumariyaan diinta Islaamka, caddaaladda, dimuqraadiyadda, dhaqanka Soomaalida iyo midnimada qaranka. Waxaa kaloo la sameeyey guddi ay soo doortaan dadka ugu saamiga badan saxaafadaha goonida loo leeyahay iyo kuwa guryaha laga sii daayo. Waxaa qodobbada saxaafadda ka mid ah in saxaafaddu xor ahaato.

Qoraalladani waxay ahmiyadda saarayaan koonfurta dhexe ee Soomaaliya iyo Maammul Goboleedka Puntland. Wariyayaasha maammulka la magacbaxay Somaliland oo madaxbannaani ku dhawaaqay 1991kii, caalamkuse weli aqoonsannin, isagana waa ka jiraan suxufiyiin la xirey iyo kuwo la soo taagay maxkamado aan sharci ahayn.

DILALKA IYO WEERARRADA

Bishii Maarso iyo Abriil ee 2007dii kumanaan Soomaali ah ayaa lagu dilay dagaalladii ka dhacay Muqdisho iyo Koonfurta dhexe ee Soomaaliya. Meelo badan oo ay shacabku ku badan yihiin ayaa si aan kala sooc lahayn loo bamgareeyey. Kuwa fallaagadana waxay weerarrada ka soo qaadaan meelaha ay dadku ku badan yihiin. Tiro badan oo dhimatayna sababta ay u dhinteen tahay dagaallada dhinacyada is-haya ku dhex dagaalamayaan rayidka gudihiisa.

Sagaal suxufi oo Soomaali ah ayaa ka mid ahaa kuwii la dilay laga soo bilaabo 2007dii. Suxufiyiintaa la diley asxaabtoodii waxay rumaysan yihiin in shan ka mid ah si toos loo diley, iyadoo loo aanaynayo qoraalladii ay qori jireen iyo wararkii ay tebin jireen

Wariyayaasha 2007dii weerar bartilmaameedka lagu diley waxaa ka mid ahaa:

- Bashiir Nuur Geeddi oo maammule ka ahaa idaacadda Shabeelle, ayaa gurigiisa lagu diley 19kii Oktoobar 2007dii. Waxaa diley niman hubaysan oo aan haybtooda la aqoonnin;

- Mahad Axmed Cilmi oo shaqaale ka ahaa Capital Voice Radio, ayaa lagu diley Muqdisho, 11kii Agoosto 2007dii. Waxaa diley nin hubaysan oo aan haybtiisa la aqoonnin;

- Cali Imaan Sharmaarke oo ahaa Guddoomiyihii idaacadda Horn Afrik 11kii Agoosto 2007dii, ayaa baabuur uu saarnaa waxaa waddada loo dhigay miino. Waxay ahayd Muqdisho. Wuxuu maammulku sheegey inay labo dhallinyaro ah loo xirey, hase yeeshee, ma jirin wax tallaabo ah oo arrintaa laga qaaday;

- Maxamed Cabdullaahi Khaliif oo shaqaale ka ahaa idaacadda Voice Peace Radio, waxaa la diley 5tii Maajo 2007dii. Gaalkacyo ayaa lagu diley, waxaana diley askari ka mid ah ciidammada Maammul Goboleedka Puntland;

- Cali Maxamed Cumar oo shaqaale ka ahaa Raadiyo Warsan, ayaa waxaa diley saddex nin oo aan la garanayn. Waxay dileen isagoo shaqo ka baxay oo gurigiisa u socda meesha lagu dilayna waa Baydhabo.

Wariyayaasha Soomaaliyeed oo kaloo la diley intuu khilaafku socday waxaa ka mid ahaa:

- Xasan Kaafi Xareed, 36 jir, ahaana sarkaal u shaqeeya Ururka Suxufiyiinta Qaranka Soomaaliyeed, waxna ku tabarruca Wakaaladda Wararka Qaranka Soomaaliyeed (SONNA) iyo shabakadda Gedo Net, ayaa waxaa baabuur uu saarnaa miino loogu dhigey waddo ka mid ah waddooyinka Kismaayo. Waxaa iyagana ku dhintay saddex ka mid ahaa shaqaalaha hay'adda (MSF), waxaana loogu dhigey miinada si ku talaggal ah. 28kii Jannaayo 2008da bay ahayd markii la diley;

- Cabdulqaadir Mahad Macallin oo loo yiqiiney 'Kaskeey', oo u shaqayn jirey idaacadda Raadiyo Banaadir waxaa la diley 24kii Agoosto, waxaana lagu diley meel u dhow tuulada Ceel Cillaan. Waxaa diley niman tuugo ahaa oo soo weeraray bas uu saarnaa oo markaa ka baxay Muqdisho una socday Gobolka Gedo;

- Abshir Cali Gabre iyo Axmed Xasan Mahad oo shaqaale ka ahaa Raadiyo Jowhar, 16kii Maajo 2007dii ayaa la diley. Waxaa kolkii hore afduubay kooxo dabley ah oo aan la garanayn, iyagoo u socda magaalada Cadale oo kolkaa uu weheliyo

Guddoomihii Gobolka Shabeellada Dhexe. Halkaas ayaa lagu wada diley iyaga iyo ilaaladii guddoomiyaha gobolka.

Miinadii baabuurka oo uu ku dhintay Cali Imaan Sharmaarke oo aynnu sare ku soo xusnay ma jirin wax baaritaan ah oo la sameeyey iyo weliba cid loo qabtay oo sharciga la hor geeyey.

Wariyayaal naftooda dil kala baxsaday, iyagana waxaa ka mid ahaa:

- Jacfar Maxamed Kuukaay oo ahaa sii-hayaha Agaasimaha Shabelle Media Network, Muqdisho, oo la soo weeraray 24kii Sebtembar 2007dii. Wuxuu ku badbaaday markii kuwii weerarka ku soo qaaday xabbadahoodii dhici waayeen. Taa ayaa naftiisii badbaadisay;

- Cabdi-khayr Maxamed Jaamac oo wariye ka ahaa Raadiyo Gaalkacyo, ayaa afar nin oo hubaysani ku soo weerareen Gaalkacyo, Puntland, waxayna afka kaga dhufteen xabbad markay taariikhdu ahayd 10kii Jannaayo 2008da.

Suxufiyiin badan ayaa u sheegey UCC inay u baqeen naftooda in la dilo markii ay arkeen shilal iyaga ku dhacay. Bishii Oktoobar 18dii sannadkii 2007dii, ayaa ciidammada dowladdu dileen qaar ka mid ah suxufiyiin ka shaqaynayay idaacaddii Raadiyo Shabeelle. Mar ay ciidammada Itoobiya weerareen idaacadda Horn Afrik, ayaa suxufiyiinta qaarkood waxay aad uga cabsi qabeen in la dilo ama la xiro. Waxay dhacdooyinkani dhaceen mar kuwa fallaagadu ay soo weerareen ciidammada DKMG ah iyo kuwa Itoobiya.

Waxaa kaloo UCC loo sheegey in tiro suxufiyiin ahi ay toddobaadyo ku noolaayeen xafiisyadooda amaba ay is qariyeen kaddib markii loo sheegey in niman dabley ahi oo dharka shibilka xiran ay ku sugayeen bannaanka guryahooda amaba ay aqalladoodii soo galeen oo ay weyddiiyeen halka ay ku maqan yihiin.

HANJABAADAHA DILALKA

Waxaa jirey suxufiyiin Muqdisho ka cararay oo UCC u sheegey in si joogta ah loogu diri jirey digniino ah in la dilayo, gaar ahaan marka ay ka warbixiyaan dagaallada. Waxaa laga soo wacaa telefoonnadooda gacanta, iyadoo soo-diruhu lambarkiisu qarsoonyahay.

Digniinno badan waxaa soo diri jirey saraakiisha u shaqeeysa NSS-ta ee DKMG, kuwaasoo aan marnaba oggolayn inay wariyayaashu ka hadlaan hawlgallada ay sameeyaan ciidammada dowladda. Waxay qaarkood ay uga digaan inaan lagu arag shabakadahooda internet-ka, haddii lagu arkana waaba ay xiraan. Laba wariye ayaa sheegey in laba diblomaasiyiin Itoobiyaan ahi oo Muqdisho ku sugan ay ka soo gaadhay hanjabaad iyo cagajuglayn.

UCC wuxuu kaloo markhaatiyayaal ka ogaaday inay diginiinno bixiyaan kooxaha ka soo horjeeda ciidammada dowladda iyo kuwa Itoobiya. Wariye ayaa sheegey:

"Waxaan qorey in nin fallaago ahi la diley. Waxaa layga soo wacay telefoonkayga gacanta, waxaana laygu yiri, 'Maxaad sheekadaa u qortay?' Waxaan ku iri, 'Waa run, waase inaan qoro'. Wuxuu igu yidhi, 'Waxaa lagugu darayaa liiska kuwa aannu dilayno'."

Suxufiyiin badan ayaan ogaan karin meelaha ay uga yimaadaan digniinuhu. Qaar ka mid ah suxufiyiintu sida ay tahay wax uma sheegaan, waayo waxay ka cabsadaan in wax loo geysto, xataa hadday waddanka dibeddiisa joogaan. Marba haddii si toos ah loo dilayo suxufiyiinta waa

Cabdulqaadir Mahad Macallin oo loo yiqiinney 'Kaskey', oo u shaqayn jirey idaacadda Raadiyo Banaadir, ayaa la diley 24kii Agoosto 2007dii. Waxaa lagu diley meel u dhow tuulada Ceel Cillaan, kaddib kolkii burcad ay soo weerartay bas uu saarnaa oo markaa ka baxay Muqdisho una socday Gobolka Gedo.

HORUMARKA SIYAASADDA

Tallaabooyin uu bishii Jannaayo 2008da qaaday Wasiirka Koowaad ee cusub ee DKMG Mudane Nuur Xasan Xuseen, waxay muujin kartaa in xiriir diirran u bilowday dowladda iyo saxaafadda iyo weliba rajo mustaqbalka laga qabo. Waxaa kaloo isna loo magacaabay Ku-xigeenka Wasiirka Koowaad iyo weliba Wasiirka Warbaahinta Axmed Cabdisalaan Aadan oo ah mulkiilaha Horn Afrik, kaasoo horey u ahaa bartilmaameedka DKMG, yoolka cadaadiska lahaanshaha gaar ahaaneed ee warbaahinta.

Bishii Jannaayo 21dii 2008da, Maalinta Saxaafadda Xorta ah ee Adduunka, wuxuu Wasiirka Kowaad ballanqaaday inuu dhammaynayo cabburinta lagu hayo wariyayaasha Soomaalida. Wuxuu intaa sii raaciyey in, "ku xadgudubkii saxaafadda xorta ahi uu dhammaaday".

Weli hubaal looma sheegi karo ballanqaadka Sharciga Cusub (eeg qoraallada hoose) in uu saameeyn ku yeelan doono dhaqanka ciidammada NSS-ta ee DKMG. Waayo weli way sii wadeen xirxiriddii suxufiyiinta iyo weliba weerarradii lagu hayay saxaafadda toddobaad ka hor inta aanu sharcigu dhaqangelinnin.


© Private

© Private

Abshir Cali Gabre oo ahaa wariye u shaqayn jirey Raadiyo Jowhar, 16kii Maajo 2007dii ayaa la diley, kaddib kolkii ay afduubatay koox dabley ah oo aan haybtooda la aqoonnin, isagoo kolkaa u safar ahaa degmada Cadale uuna weheliyey Guddoomiyihii Gobolka Shabeellada Dhexe.

WEERARKII CIIDAMMADA ITOOBIYA KU QAADEEN XAFIISKII HORN AFRIK

Bishii Noofembar 2dii 2007dii, kol bamgacmeed lagu tuuray, waxaa ciidammada Itoobiya hawlgallo ka wadeen meel u dhow Horn Afrik. Waxaa lagu diley saddex ka mid ah ciidammadii Itoobiya, dibna waa ay u gurteen. Meydkii saddexdii askari ee Itoobiya ayaa dadkii xaafadda degganaa waxay ku jiideen dhulka. Wariye ka tirsan Horn Afrik ayaa UCC u sheegey:

"Kaddib waxaa dhacday in ciidammadii Itoobiya oo tiradoodu gaadhayso ilaa 200 oo askari ay guri-guri xaafaddii u baadheen. Waxay kaxaysteen dad badan oo uu ku jiro waardiyihii idaacadda Horn Afrik."

"Waxay ciidammadii Itoobiya soo galeen saldhiggii raadiyaha, halka ay wariyayaashu dhammaantood isku ururshеen istuudiyaha ama qaybaha kale ee xafiiska. Baqdin ayaa gashay ciidammada Itoobiya. Waxay ahaayeen ciidammo cusub aad bayna u cabsanayeen, sababtoo ah marar badan ayaa dhacday in kolkay aqal galaanba qarax ay la kulmayeen."

"Kaddib waxay guryihii nagu dhowaa ka kaxaysteen toddoba ilaa iyo siddeed qofood, waxayna markii dambe soo celiyeen saddex qof meydkood oo uu ku jiro wardiyihii Horn Afrik oo ay surka ka gooyeen. Isla xilligaas, waxaa socday waanwaan iyo wadahadallo oo kaddib lagu heshiiyey in meydadka laysu soo celiyo. Itoobiyaankii waxaa loo soo celiyey meydkii saddexdoodii askari. Beddelkoodii, waxay iyaguna ku weydaarsadeen saddex qofood oo meyd ah oo uu ku jiro gaadhkii."

"Maalintaa wixii ka dambeeyey, markii aan reerkaygii ku noqday, aniga iyo dhammaan suxufiyiintii kaleba waxaannu ku dhici weyney inaannu xafiiskii dib ugu noqonno. Waxaannu markiiba biloownay sidii aannu Muqdisho uga bixi lahayn. Kaddib markaannu aragnay mid shaqaalahayagii ah oo ay ciidammada Itoobiya surka ka soo gooyeen, annagana waxaa na gashay cabsi ah inay sidoo kale noo geli karaan."

Wariye kale oo goobta joogay ayaa UCC u sheegey:

"Waxaa ii muuqda sidii ay waardiyihii u dileen inay ahayd sida riyaha loo gowraco, meeshii ay ku dileenna waxaa is qaatay dhiig. Taasina waxay igu dhalisay go'aan ah inaan Muqdisho ka baxo."

inay hanjabaadaha aad uga fiirsadaan oo u digniin qabaan.

Waxaa UCC rumaysan yahay digniinta la siinayo suxufiyiinta in loogu talaggalay inaan waxba laga ogaan dhibaatooyinka Soomaaliya ka jira. Iskudday kasta oo saxaafadda lagu xakamaynayaana waxay ka hor imaanaysaa sharciga saxaafadda ee dalalka waddammada Afrika u dhigan. Sharcigaas oo oggolaaday xuquuqda uu suxufigu leeyahay. Sharcigaas qodobkiisa sagaalaad wuxuu oggolaanayaa xuquuqda buuxda ee uu wariyaha leeyahay.

XIRXIRIDDA IYO XABSIYADA

Tiro wariyayaal ah ayaa u sheegey UCC in ciidammada dowladda iyo kuwa Itoobiya ay xireen markii ay ka warbixiyeen iska-horimaadyada u dhexeeya iyaga iyo kuwa fallaagada, iyo weliba markii ay waraysiyo ka qaadaan ciddii dowladda ka soo horjeeddaba. Waxaa kaloo jirey suxifiyiin la xirey mar ay ciidammada Itoobiya iyo kuwa dowladdu ay weerareen goob u dhow meel wararka laga baahiyo. Muddada aad u xirnaanaysid waa labo saac ilaa 11 maalmood. Marna ma dhicin suxufi intii la xirey maxkamad la geeyey.

Wariye ka shaqeeya warbaahinta Shabeelle ayaa sheegey, kaddib kolkii loo aqoonsaday inuu wariye yahay, in ciidamada Itoobiya ay isaga qabteen oo ku xireen meel u dhow magaalada Beledweyne. Si qarsoodi ahna waxaa loogu gudbiyey dalka Itoobiya. Waxaa lagu xirey xero ciidan oo u dhow tuulo ku taalla waqooyi-bari kana tirsan magaalada Dessie. Wuxuu halkaas ku xirnaa muddo lix maalmood ah. Kaddib waa la sii daayay isagoo wax dembi ah aan lagu soo ooginnin. Nasiib wanaag, isagoo nabad ah ayuu Soomaaliya ku soo noqday. Muddo dabadeedse, dalka wuu isaga dhoofay, kaddib kolkii dhowr jeer la siiyey hanjabaado dil ah, Kiinya ayuuna u dhoofay.

Waxaa kaloo jirey wariyayaal badan oo ay ciidammada DKMG dhowr jeer xirxireen. Ururka Suxufiyiinta Qaranka Soomaaliyeed, wuxuu sheegey in ilaa iyo 2007dii la xirey 53 suxufi, kuwaasoo laga kala xirey Koonfurta Soomaaliya, Gobollada Dhexe iyo Puntland. Wariyayaasha ay xireen ciidammada DKMG, intooda badan waxay farta ku fiiqeen ragga iyaga xirxirtey inay ka mid ahaayeen NSS oo uu madax u yahay Jeneraal Maxamed Aadan oo loo yaqaan "Darwiish".

UCC wuxuu qabaa in xarigga iyo xabsi-ku-haynta, iyadoo aan qofka maxkamadi la soo taagin, uu ka hor imaanayo xeerka u yaalla xuquuqda aadanaha Afrika. Waayo wararka wariyayaashu ay tebiyaan ma aha mid jabinaya sharciga dalka u yaalla, isla markaana haddii sharcijabin ay sameeyaanna, lama soo hor taago maxkamad sharci ah oo dembi ku soo oogta.

XIRITAANNADA GOOBAHA WARBAAHINTA

Ciidammada DKMG ahi si joogta ah ayay mar walba u xiraan goobaha warbaahinta ama wariyayaasha, haddii ay wax ka sheegaan dowladda amaba ay waraystaan kooxaha ka soo horjeeda ciidammada dowladda iyo kuwa Itoobiya. Xiritaanku wuxuu qaataa muddo gaaban, inakstoo ay aad u badnayd dhammaadkii sannadkii 2007dii. Waxaa kaloo isla wakhtiyadaas laga bilaabo 12kii Noofembar ilaa 4tii Disembar la xirey idaacadihii Shabeelle iyo Simba. Waxaa amarka lagu xireyna bixiyey Guddoomiyaha Gobolka Banaadir isla markaana ah Duqa Magaalada Muqdisho Maxamed Cumar Xabeeb oo loo yaqaan "Maxamed Dheere".

Ciidammada dowladdu waxay kaloo lug ku lahaayeen xiritaanno loo geystey goobaha warbaahinta oo qaarkood wararka laga siiddaayo. Waxaa inta badan hawlahaa fuliya ciidanka NSS-ta iyo kuwa booliska ee hoos yimaada Duqa Magaalada Muqdisho. Xiritaannadaa loo geysto goobaha warbaahinta, iyagoo aan horey loogu sheegin waxay curyaamisaa xoriyadda wariyayaasha iyo xorriyadda hadalka iyo fekerka.

Waxaa suxufiyiin badani u sheegeen UCC in markii xiritaanno isdaba joog ah ay ku dhacday saxaafadda ay wariyayaashii ku habsatay shaqo la'aan iyo weliba aanay jirin cid ka warbixisa waxa magaalada ka dhacaya.

AMARRADA DKMG OO XADDIDAYA WARBAAHINTA

Madaxda DKMG ahi waxay soo saareen amarro lagu xaddidayo warbaahinta xorta ah. Bishii Maarso 28dii 2007dii, Wasiirka Warfaafinta ee Maammul Goboleedka Puntland Abdiraxmaan Maxamed Bankax, ayaa mamnuucay dhaqdhaqaaqa saxaafadda xorta ah wixii aan horey wasaaradda oggolaansho uga haysannin.

Bishii Noofeembar 26dii ee 2007dii ayaa Guddoomiyaha Gobolka Banaadir soo saaray amarro lagu xakamaynayo saxaafadda goonida loo leeyahay, taasoo u horseedday intoodii badnayd in albaabbada loo xiro. Waxaa laga wariyey, sida laga soo xigtay saxaafadda Soomaalida, isagoo ka hadlayay shir jaraa'id:

"Ma warin karto warbaahintu hawgallada ciidammada DKMG iyo kuwa Itoobiyaanka, haddii aanay haysan qoraal u oggolaanaya in macluumaadkaas baahiso. Waa mamnuuc waraysiyada laga qaadayo mucaaradka dawladda, ama ha noqdeen kuwa gudaha ah ama dibeddaba. Wariyihii ka faafiyaa idaacaddiisa fekredaha mucaaridka waxaa loo arki doonaa inuu yahay dambiile. Baahinta wararka dadka barakacay, waxay u baahantahay in wariyayaashu ay haystaan tirakoob saxan oo ku saleeysan macluumaadkooda, haddii kale waa mamnuuc in wararkaas la shaaciyo."

Waxaa cadaadiskaas la qaaday 4tii bishii Disembar ee 2007dii, kaddib markii ay cambaareeyeen ururrada saxaafadda, hay'adaha aan dowliga ahayn iyo ururrada

© AFP/Getty Images

Meydka wariye Soomaali ah, Cali Imaan Sharmaake, guddoomihii idaacadda Horn Afrik, lagu diley shil bam-gaadhi, Muqdisho, 11kii Agoosto 2007dii.

© Private

Axmed Xasan Mahad oo ahaa wariye u shaqayn jirey Raadiyo Jowhar, 16kii Maajo 2007dii ayaa la diley, kaddib kolkii ay afduubatay koox dabley ah oo aan haybtooda la aqoonnin, isagoo kolkaa u safar ahaa degmada Cadale uuna weheliyey Guddoomiyihii Gobolka Shabeellada Dhexe.

hoos yimaada QM ee Soomaaliya ka shaqeeya.

CIIDANKA NABADSUGIDDA SOOMAALIDA [NSS] AYAA DABARGOOYNTA HOGGAAMIYA

Ciidanka NSS-ta ee DKMG, sida ay tilmaameen warirayaal Soomaaliyeed, inay ka mas'uul yihiin, inta badan, haddidka iyo xadhigga suxufiyiinta. Ciidanka NSS-tu waxay weerarro isdaba joog ah ku qaadaan guryaha wariyayaasha, waxayna xidhaan goobaha warbaahinta ee faafiya wararka ka soo horjeeda danaha DKMG.

"Qaar ka mid ah ciidammada DKMG ah oo hoos yimaada ku-xigeenka NSS-ta 'Askar', ayaa yimid gurigayga iyagoo aniga i baadiggoobaya. Waxaa la ii sheegey in ciidammada DKMG ay aniga i daydayayaan. Raadgadasho ayaan sameeyey. Laba bilood ku dhowaad baan dhuumasho ku jirey. Telefoonkaygii gacanta ayaan bakhtiiyey. Ugu dambayntii dalka ayaan ka dhoofay."

Dhacdooyinkan oo kale way badanyihiin: *"Waxaa layga soo wacay lambar qarsoon iyo nin yidhi: 'Waxaa magacayga la yiraahdaa Cabdi, waxaanna ka socdaa NSS-ta. Adiga ayaa faalladatan qoray, sow maaha? Waa inaad ka saartaa shabakadda warka, ama adiga ayaa ka mas'uul noqon doona wixii kaa soo gaadha'. Waxaan ku idhi: 'Aniga ayaa qoray, sababtaan u qorayna maaha mid ku saabsan ammaanka qaranka ee waa arrin siyaasadeed'. Wuxuu yidhi: 'Hawraarsan, Looba joogee wixii kaa qabsada'."*

Tiro badan oo wariyayaal ah ayaa saraakiisha NSS-tu xirxirtay. Oktoobar 15dii, 2007dii, waxay ciidammada NSS-tu xirxirtey 19 shaqaale oo ka tirsanaa idaacadda Raadiyo Shabeelle, waxaana loo kaxeeyey madaxtooyada. Halkaasoo waraysiyo saraakiil sarsare ka qaadday oo ka tirsanaa booliska DKMG.

Suxufiyiin kale ayaa UCC u sheegey in intii ay xirnaayeen oo waraysiyada laga qaadayay ay ciidammada nabadsugiddu sheekeysiga dhexdooda ahi ay si aan qarsoodi ahayn ugu sheekeysanayeen in kuwa la hayo la dili iyo in kale.

Wariye xirnaa muddo 11 toban casho ah, bishii Abriil 2007dii, kaddib kolkii uu wariyey mar ay ciidammada DKMG ay kala siibayeen miino dhulka la dhigey, ayaa yidhi:

"Waxaan u sheegey inaan ahay Suxufi u shaqeeya idaacadda Horn Afrik. Anigu shaqadayda ayaan gudanayaa, inaan wariyo hawgallada. Waxaan tusay kaadhkaygii aqoonsiga. Ku-xigeenka ciidanka NSS-ta 'Askar' wuxuu igu yiri: 'Aad baannu u necebnahay idaacadda Horn Afrik'. Markii ugu horreysay ee ay i qabteen, waxay iga qabteen meel u dhow garoonka diyaaradaha. Waa i ciqaabeen oo i jirdileen oo waxay ila dhaceen qoriga baadkiisa. Wax su'aalo ah ima ay weyddiinnin oo waa i kaxaysteen. Waxay ka hadleen inay i dilaan iyo inay i xiraan. Qaar ka mid ah raggii i qabatay ayaa yidhi: 'Waa mushkilad haddii aannu qofkan kaxaynno oo xidhno oo aannu gaadh ka qabanno; mayee, waxaa innooga hawlyar oo ka wanaagsan inaannu dilno'. Qaar kale ayaa lahaa waxaa ka wanaagsan inaannu xirno. Qaarkood ayaa wax ka garanaya waxa saxaafadda iyo aadminnimadu tahay, iyo inay waxyeello ka soo gaadhi karto dilka ama godobta kaga iman karta ama in qofka la dilayo uu yahay wariye."

Wuxuu wariyahakan u sheegey UCC in kolkii hore reerkiisu la weyddiistay inay bixiyaan lacag madax-furasha ah oo gaadhaysa ilaa iyo $8000.00, ka gadaalse waa la sii daayay, iyadoo aan wax lacag ah la bixinnin, kaddib kolkii xadhiggiisa wakaaladaha wararka laga baahiyey.

AMMUSIINTA WARARKA KU SAABSAN KUTUMASHADA XUQUUQDA AADANAHA

Wuxuu Ururka Cafiska Caalamka [UCC] aamminsanyahay in si ku talaggal ah weerarro loogu qaado wariyayaasha

© Private

Cali Maxamed Cumar, wariye u shaqayn jirey Raadiyo Warsan, ayaa waxaa lagu diley degmada Baydhabo, 16kii Febraayo 2007dii.

Soomaaliyeed si loo daboolo kutumashada xeerka guud iyo sharciyada caalamiga ah ee xuquuqda aadanaha u yaalla, kaasoo ay jebiyeen dhammaan dhinacyada ay dirirtu ka dhaxayso. Codadka kale ee kari karay inay ka hadlaan kutumashada xuquuqda aadanaha, sidoo kale, iyaguna waa la aammusiyey.

Intuu qalalaasaha dagaal uu cirka isku shareerey, waqtigii Maarso/Abriil 2007dii, waxaa si aad ah loo cabburiyey ururradii degaanka ee madaxbannaanaa oo ka firfircoonaa Muqdisho. Kuwo badanoo difaaci jirey xuquuqda aadanaha ayaa lagu khasbay ama inay waddanka ka haajiraan ama dhuuntaan, kaddib kolkii ay u adkaysan waayeen hanjabaadda, cagajuglaynta iyo weerarka kaga imanayay dhammaan dhinacyada dagaalka isku haya. Oktoobar 2007dii waxaa Duqa Magaalada Muqdisho amar ku bixiyey in la xiro kooxda Ururka Xuquuqda Aadanaha ee Elman taasoo khasabtay in guddoomiyihii ururku dhuumaalaysto.

Hay'adaha aadminnimo ee caalamka ayaa waxaa ku sii kordhay cadaadiska kaga imaanaya madaxda qaarkood ee DKMG ah. Labada dhinac ee ciidammada dawladda iyo kuwa fallaagada ahiba waxay si joogta ah u xakameeyaan gargaarka aadminnimo ee daabulaynta iyo cunno gaadhsiinta dadyowga u baahan. Wararka uu UCC helay ayaa sheegaya in hay'adaha gargaarka aadminnimada lagu khasbay in ayan ka warramin hadday la kulmaan kutumasho xuquuq aadane ka socota goobaha ay ka shaqeeynayaan si ay u wataan hawllahooda gargaarka aadminnimo.

Inkastoo ay awoodeen idaacadaha caalamiga ah iyo ururrada u dooda xuuuqda aadanaha in ay ka hadlaan kutumashada xuquuqda aadanaha, misana inta badan waxaa jira dhacdooyin fara badan oo aan la shaacinnin.

Khariiradda Soomaaliya

WEERARKII CIIDAMMADA DKMG KU QAADEEN RAADIYO SHABEELLE

Bishii Oktoober 18dii, ayaa waxay ciidammada DKMG ahi weerar ku qaadeen xafiiska idaacadda Shabeelle. Daaqadaha dabaqa labaad iyo kan saddexaad ayay waxay ku fureen xabbado si darandoorri ah uga dhacaya qoryaha casriga ah. Wuxuu weerarkaasu socday muddo shan saacadood ah. Dhismaha gudihiisa waxaa ku go'doomay suxufiyiin badan, waardiyana wuu ku dhaawacmay.

Weerarkani wuxuu dhacay kaddib kolkii kooxaha fallaagada ahi ay bam-gacmeed ku tuureen ciidammada DKMG kob u dhow agagaarka xafiiska Raadiyo Shabeelle. Warar badan oo uu helay UCC ayaa tilmaamaya in weerarku aanu jawaab toos ah u ahayn bam-gacmeedka. Waxaa la wariyey in weerarku uu ahaa mid qayb ka ah hab dhaqameedka dagaal ee ciidammada DKMG iyo u aabayeelid la'aanta weerarradooda kaddib kolkii bam-gacmeed lala beegsaday.

Suxufiyiin u shaqaynayay idaacadda Shabeelle waxay UCC u sheegeen inay rumaysteen in ayan badbaadayn oo markiiba ehelladoodii waceen si ay u nabadgelyeeyaan.

"Waxaannu hoos galnay miisaska hoostooda. Waxay istimaalayeen gaadhi uu saaranyahay qoryaha darandoorriga u daca. Rasaastu gudaha ayay u soo gudbaysay, iyadoo daaqadaha burburinaysa. Nasiib wanaag, anigu kumaan dhaawacminnin. Saacado ayay duqeynayeen. Waxaannu wacnay Ururka Suxufiyiinta Qaranka Soomaaliyeed iyo ururrada caalamiga ah. Waxaannu u sheegney in xabbado na lagu soo furay, in xafiiskayagii la soo weeraray. Ugu dambayntii, mid mid ayaannu goobtii uga baxsanay, innagoo ka baxnay albaabbada dambe. Weerarkan kaddib, ciidammadu xafiiskayagii ayay saldhig ka dhigteen, mana noo suurtaggelin inaannu wax shaqo ah qabanno ilaa iyo 1dii Noofeembar."

Xiritaannada iyo xakamaynta loo geysto goobaha warbaahinta iyo wariyayaasha madaxbannaani, ayaa hoos u dhac ku keentey ka warbaahintii falalka ay sameeyaan ciidammada DKMG, Itoobiya iyo kuwa fallaagada. Cadaadisku wuxuu kaloo hor istaagay warbaahintii laga samayn lahaa falal dambiyeedka burcadda hubaysan sameeyso. Waxaa iyaguna halkoodii ka sii socday falalkii xumaa ee horey uga jirey Muqdisho, gobollada koonfureed iyo kuwa dhexe ee Soomaaliya.

WARIYAYAASHA SOOMAALIYEED OO U BAAHAN ILAALINTA NABADGELYADOODA

Waa muhiim oo waa lagama maarmaan wariyayaasha Soomaaliya jooga ee ka warbaahinaya dhibaatada waddanka ka jirta. Waa arrin daruuri ah in wariyayaashu difaacaan xuquuqda aadanaha. Kol allaale iyo kolka ay qoraan ama baahiyaan arrimo ku saabsan xuquuqda aadanaha, waxay faafinayaan oo ku dareen gelinayaan dadka halka uu joogo ama marayo xuquuqda aadanaha dalka. Xukuumadduna waa ku khasbantahay in ay ilaaliso oo ixtiraanto arrinkaas. Wariyayaashu waxay kaloo shacabka u tebiyaan xadgudubka xuquuqda aadanaha, taasoo ah waajib saaran DKMG iyo xukuumadda Itoobiya in ay ilaaliso.

UCC wuxuu maammulka ka jira Soomaaliya ugu baaqayaa in uu xushmeeyo oo ilaaliyo xoriyadda hadalka oo uu joojiyo weerarrada lagu hayo wariyayaasha.

Amnesty International
International Secretariat, Peter Benenson House
1 Easton Street, London WC1X 0DW
United Kingdom
www.amnesty.org

AI Index: AFR 52/001/2008
March 2008

TALAJEEDINNO

TALAJEEDINNO KU AADDAN DKMG AH

- In la dhaqangeliyo ballanqaadkii uu sameeyey Wasiirka Koowaad ee DKMG ah Mudane Nuur Xasan Xuseen oo ahayd inuu joojiyo dabargooynta suxufiyiinta Soomaaliyeed;
- In la joojiyo iska xirxiridda wariyayaasha;
- In la joojiyo hanjabaadaha loo geysto suxufiyiinta iyo weliba in la joojiyo xiritaanka lagu sameeyo goobaha warbaahinta;
- In la xaqiijiyo in la sameeyo baaritaanno dhab ah oo caaddil ah, sababta sharciddarrada loogu dilayo iyo hanjabaadaha iyo cagajugleeynta loogu geysanayo wariyayaasha. In sharciga la horkeeno, maxkamad caddaalad ah oo waafaqsan heerka sharciyada caalamka, kuwa falalka dambiga dilka ah galay, iyadoo aan dil lagu xukumayn;
- In DKMG ahi amarto ciidammadeeda NSS-ta inay xaqdhowraan xuquuqda saxaafadda xorta ah iyo inay ka joogaan hanjabaadaha iyo cagajuglaynta ku aaddan wariyayaasha.

TALAJEEDINNO KU AADDAN CIIDAMMADA ITOOBIYA EE KU SUGAN SOOMAALIYA

- In la joojiyo iska xirxiridda wariyayaasha;
- In la joojiyo xiritaanka lagu sameeyo goobaha warbaahinta;
- In Itoobiya ciidammadeeda ku amarto inay ixtiraamaan hadalka xorta ah iyo inay ka joogaan falalka handadaadka iyo cagajuglaynta ku aaddan suxufiyiinta.

TALAJEEDINNO KU AADAN DHAMMAAN FALLAAGOOYINKA:

- In la joojiyo weerarrada lagu hayo wariyayaasha;
- In la joojiyo cabsigelinta iyo handadka wariyayaasha;
- In la xurmeeyo xuquuqda xorriyadda hadalka.

TALAJEEDINNO KU AADDAN BEESHA CAALAMKA

- Inay ogaadaan shaqsiyaadkii iyo ururradii ku xadgudbay oo jebiyey xuquuqda aadanaha, sida NSS-ta, iyo weliba wadammada kharajka iyo tababbarrada siiya;
- In wasiilo kastoo dibloomaasiyeed oo jirta loo maro dhinacyada dirirtu ka dhexeyso oo ay xaqdhowraan wariyayaasha Soomaaliyeed iyo xorriyadda hadalka;
- In taageero lagu siiyo QM, ururrada aan dawliga ahayn – kuwooda caalamiga iyo gudahaba – dadaalkooda ah in ay ilaaliyaan wariyayaasha Soomaaliyeed. Inay siiyaan tababbarro iyo taageero sidii kor loogu qaadi lahaa madaxbannaanidooda;
- In Suxufiyiinta Soomaaliyeed ee ku khasbanaaday in ay dalkoodii ka soo haajiraan la siiyo magangelyo iyo ammaan oo la joojiyo in aan xoog Soomaaliya loogu celinnin.

AMNESTY INTERNATIONAL

Ururka Cafiska Caalamka [UCC] waa dhaqdhaqaaq caalamiyeed oo ka kooban 2.2 malyan oo ruux oo ku kala nool in ka badan 150 waddan iyo dhulalba, kuwaasoo xuquuqda aadanaha u ololeeya.

Aragtidayadu waa, dhammaan xuquuqda lagu maqaantaagay Bayaanka Caalamiga ee Xuquuqda Aadanaha iyo dokumentiyada kale ee sharciyada caalamiga ah ee xuquuqda aadanaha, mid uu qof kasta ku rayrreeyo. Baaritaan ayaannu samaynnaa, olole baannu qaadnaa, waannu ka doodnaa oo ka qaylaggeeynnaa si aannu u cidhibtirno kutumashada xuquuqda aadanaha. UCC waa urur ka madaxbannaan dawlad, idiloojiyad siyaasadeed, dano dhaqaaleed ama diimeed.

Shaqadayada, inteeda badan, waxaa maalgeliya tabarruca xubnahayaga iyo deeqaha aannu helno.